

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADA
(LIGO MEDICAL SUPPLY)



MUQDISHO-SOOMAALIYA

2022

UJEEDO:- DHISMAHA SHARCIGA SHIRKADA LIGO MEDICAL SUPPLY

Maanta oo ay taariikhdu tahay **29/06/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

1-MAXAMED XUSEEN AXMED, Sita baasaboorka lamarkiisu yahay P00975566, kuna lifaaqan Dukumintigaan.

2- CABDIRISAAQ NUUR SHIRE, Sita baasaboorka lambarkiisu yahay P01181854, kuna lifaaqan Dukumintigaan.

3-CABDULWADUUD XUSEEN AXMED, Sita baasaboorka lambarkiisu yahay P00897655, kuna lifaaqan Dukumintigaan.

Mudanayaasha kor ku xusan iyagoo caafimaad qaba, caqligooduna taam yahay, Cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxay i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo Shirkad oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1-AAD
MAGACA LIGO MEDICAL SUPPLY**

Mudanayaasha aan kor ku soo sheegay waxa ay sameysteen Sharci Shirkad lagu magacaabo (LIGO MEDICAL SUPPLY) oo ah Shirkad gaar Loo leeyahay (Private Company).

**QODOBKA 2-AAD
WAQTIGA LA' AASAASAY SHIRKADA**

Shirkada (LIGO MEDICAL SUPPLY) waxaa la'aasaasay Tr.23-06-2022, Sida ku cad Shatiga No.434769 kana soo baxay D/hoose ee Muqdisho. waxaana lagu aasaasay magaalada Muqdisho caasimadda Soomaaliya.

**QODOBKA 3-AAD
NOOCA SHIRKADA**

SHIRKADAN waa Shirkad gaar Loo leeyahay, waxaana ku soo biiri Kara Saamiley kadib markuu Saxiixo Maamulaha Guud ee Shirkada.

**QODOBKA 4-AAD
XARUNTA SHIRKADA**

Xarunta Shirkada waa Muqdishu caasimadda Soomaaliya Degmada Howlwadaag — Waxda Tabeelaha, Xarumaha, Shirkada waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriirayaa maamulaha guud ee Shirkada.

QODOBKA 5-AAD
UJEEDDOOYINKA SHIRKADA

1- Ganacsiga Qalabka Caafimaadka.

QODOBKA 6-AAD

RAASIMAALKA SHIRKADA & SIDA MILKIILAYAASHA U KALA LEEYIHIIN

Raasumaalka Shirkada waa lacag dhan US \$60,000 (Kontan kun oo doolarka Mareykanka ah)

Waxayna u kala leeyihiin Milkiilayaasha Shirkada sida shaxda ku cad.

No.	Magaca Milkiilaha	Lacagta	Saamiga
1	MAXAMED XUSEEN AXMED	\$ 20,000	33%
2	CABDIRISAAQ NUUR SHIRE	\$ 20,000	33%
3	CABDULWADUUD XUSEEN AXMED	\$ 20,000	33%

QODOBKA 7-AAD
GADASHADA SAAMIGA

Marka Uu ku soo biiro Saamile kale waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa Milkiilayaasha kale Ee Shirkada iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo 90 maalmood ah, wuxuu u madax banaan yahay in uu ka gato cidduu rabo.

Saamiyada waa la kordhin karaa haddii loo baahdo saamiga islamarkaana saamile kasta waxaa uu xaq uleeyahay inuu kordhin karo saamigiisa.

QODOBKA 8-AAD
QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAHA


Faa'iidada iyo khasaara wixii yimaado waxaa iska leh dhamaan Milkiilayaasha, iyo Saamileeda. Hadba qofka intuu la'egyahay Boqoleydiisu.

QODOBKA 9-AAD
SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE SHIRKADA

Shirkada waxey leedahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Shirkada ayaa Loo isticmaalayaa dhammaan hantida Shirkada sida: Qalabka Caafimadka Nucyihisa kala duwan, sumadaha Shirkada iyo tiimbarayaasha.

QODOBKA 10-AAD

QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA SHIRKADA



QODOBKA 11-AAD AWOODAHA MAAMULKA SHIRKADA

Awoodaha Maamulaha Guud ee Shirkada.

- 1- Waa matalaha Shirkada ee dhammaan heshiisyada ay Shirkada galayso.
 - 2- Wuxuu siin karaa wakaalad guud ama mid gaar ah xubin kamid ah milkiyaasha Shirkada
 - 3- Waa saxiixaha foomka kamid noqoshada Shirkada
 - 4- dabagalka iyo kormeeridda dhammaan shaqooyinka Shirkada Awoodaha Madaxa Maaliyadda ee Shirkadda.
- 1- Wuxuu maamulayaa akoonada Shirkada ee ka furan bankigayada
 - 2- Diiwaan galinta xisaabaadka Shirkada
 - 3- Samaynta xisaab xir sanadeedka Shirkada

FG. Waxaa akoonka lacagta ka bixin karaan 1- Mohamed Xuseen Axmed, 3- Cabdirisaaq Nuur Shire 3- Cabdiwadud Xuseen Axmed, marka lahelso 2, qof oo kamida milkiila yaasha ayaa Akoonka lacag kasaarikaarn ama kushubikaraan. Marka ay saxiixaan

QODOBKA 12-AAD

GEERI AMA WAALLI KU TIMAADDA MILKIILAHA

Haddii waalli ama geeri ku timaado milkiilaha Shirkada waxaa saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

QODOBKA 13-AAD

MUDDADA JIRITAANKA SHIRKADA

Shirkada waxey jiraysaa muddo dhan 60 sano mudada jiritaanka Shirkada wa la kordhin karaa haddii ay ogolaadaan milkiilayaasha Shirkada waana layareyn karaa.

QODOBKA 14-AAD

BAABI'INTA SHIRKADA

Shirkadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaado xaladaha hoos ku xusan:-

1. Haddii ay dhammaan xubnaha shirkadda isku raacaan baabi'inta shirkadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida shirkadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna weydo kabidda saamileyda.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'iniya shirkadaha nuucaan ah.

QODOBKA 15-AAD

KALA QAYBSIGA HANTIDA SHIRKADA

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Shirkada ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Shirkada iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay Shirkada.

QODOBKA 16-AAD

WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADA.

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Shirkada waxaa la raacayaa xeerka Shirkada iyo sharciga shirkadaha ee dalka u degsan.

QODOBKA 17-AAD

DHAQAN GALKA SHARCIGA SHIRKADA

Sharciga Shirkada wuxuu dhaqangelayaa marka ay saxiixaan milkiilayaasha Shirkada, waxayna heshiisnaan ay kala_saxiixdeen, kadib markii ay akhristeen, raalina ka noqdeen sida aan u qoray heshiisnaan, waana kan saxiixoda hoos ku cad:-


QODOBKA 27

HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY

27 QODOB 1 COVER , 6 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAYAASHA

MAXAMED XUSEEN AXMED



CABDIRISAAQ NUUR SHIRE



CABDULWADUUD XUSEEN AXMED




(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 264 /T.P.N/22, Tr.30/06/2022 Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"







Ujeedo:- HESHIIS KIRO..

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2022, Anigoo ah Ibraahim Maxamuud Maxamed {goomeey} oo soomaali ah, degan xamar, dhashay sanadkii 1960kii, oo hooyadeey la yiraahdo Xaawo Cabdulle Caddow, lehna Passport halkaan ku lifaaqan, ahna wakiilka Shirkadda Baxaya G. T. Company, waxaan qoraalkaan ku caddeynayaa in aan heshiis kiro la galay mudane Maxamed Xuseen Axmed, oo soomaali ah, degan xamar, waxaaana ku wada heshiinay sidaan soo socota:-

1. waxaan ka kireeyey Maxamed Xuseen Axmed, qolka ku yaala, Degmada H/wadaag, (Suuqa Bakaaraha), Cabirkiisu dhan yahay 8-mitir.
2. waxaan ku wada heshiinay kirada Bishii \$400,00 (Afar Boqol oo Doolar).
3. waxa uu ii hormariyey 7-bilood lacagtood oo ah (\$400x7-Bil=\$2,800 (Laba Kun iyo Sideed Boqol oo Doolar).
4. kiradu waxay ka bilaabaneysaa 10/06/2022 waxayna ku eg tahay 10/01/2023.
5. inta kiradu sacoto waa sida uu u dhacay heshiiska kirada.
6. laga kireeyaha qolka cid kale kuma sii wareejin karo furaha, haddiise uu ka maarmo waa in uu furaha kusoo celiyaa milkiilaha.
7. haddii uu milkiiluhu u baahdo qolka, waa in uu ku wargaliyaa laga kireeyaha, siiyaana muddo 2-bilood ah oo ka bilaabata markii la wargaliyo.
8. laga kireeyaha qolka markii uu guurayo waa in uu soo wareejiyaa qolka oo ah sidii uu ahaa markii uu dagaayey.
9. dhamaan inta uu quseeyo heshiiskan waxay saxiixeen halkaan hoose aqbal ahaan, kadib markii ay iska aqriyeen amase loo aqriyey.

Saxiixa milkiilaha

Ibraahim Maxamuud Maxamed
Tel 0615575786

Saxiixa kireystaha

Maxamed Xuseen Axmed
Tel 061945558

1. Cabdirasaaq Nuur Shire
Tel 0619449944

Marqaatiyaal
2. Abshir Isaaq Maxamuud
Tel 0615715638

3. Cabdixakiim Cali Gureey
Tel 0615554010

Rep. No. 27175/2022.

Muqdisho 21/06/2022


Saxiixiyadda La sugay

Anigoo ah Dr' Aaden Jimcaale Maxamed, oo nootaayo xamar ah, waxaan Caddeynayaa, in saxiixiyadda kor ku qorani ay yihiin, kuwii Dhabta ahaa, ee milkiilaha, lagakireeyaha, iyo marqaatigaba oo soomaali wada ah, waxay heshiiskan ku wada saxiixeen Horteyda.

By MTX

NOOTAAYAHA
Dr' Aaden Jimcaale Maxamed






Kireeye




Laga kireeye




Marqaatiyaal



Maraga 1aad



Maraga 2aad



Maraga 3aad



388147



LAMBAR BOONADA 001-0000062327

LACAGTA

100.00

**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
SHATIGA GANACSIGA**

Business Permit

TAARIIKH / Date 19-Oct-2021

SHATIGAAN WAXAA LA SHIYEY

This permit hereby is granted to

LIGO TRADE & SERVICE

MAGACA GANACSIGA (Tradenname)

MOHAMED HUSSEIN AHMED

MAGACA MILKIILAHA / MAAMULAHA (Name of Owner / Manager)

WAXAA LOO OGOLAADAY OO KALIYA GANACSIGA HOOS KU XUSAN:

To operate and engage in the business/es of:

FARMASHIYAHA IIBIYA DAAWADA TAFAAARIQDA

SHATIGAN WAXA LOO OGOL YAHAY OO
KALIYA CINWAANKA GOOBTA HOOS KU XUSAN

Business under this permit shall exclusively be
Conducted at the address indicated below:

Degmada/Deegaanka:	Yaaqshiid	WAAXDA:	Horseed
LAANTA:	N/A	TABEELAHA:	N/A

SHATIGAN WAXA UU DHACAYAA

This permit expires on the **19-Oct-2022**

Hadii aadan ka run sheegin machuumaadka aad bixisay, ogsoonow in Shatiga dib lagaala noqon doono iyadoo waliba sharciga lagula tiigsan doono.



Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed

Cumar Maxamuud Maxamed

KOMBUYUUTAR SHATI

LAMBAR / Computer Serial No.

40032



434769



LAMBAR BOONADA 004-0000072649

LACAGTA 100.00

**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
SHATIGA GANACSIGA**

Business Permit

TAARIIKH / Date 23-Jun-2022

SHATIGAAN WAXAA LA SHIYEY

This permit hereby is granted to

LIGO MEDICAL SUPPLY

MAGACA GANACSIGA (Tradename)

MOHAMED HUSSEIN MOHAMED

MAGACA MILKIILAHA / MAAMULAHA (Name of Owner / Manager)

WAXAA LOO OGOLAADAY OO KALIYA GANACSIGA HOOS KU XUSAN:

To operate and engage in the business/es of:

GANACSIGA QALABKA CAAFIIMAADKA LAGU IIBIYO

SHATIGAN WAXA LOO OGOL YAHAY OO
KALIYA CINWAANKA GOOBTA HOOS KU XUSAN

Business under this permit shall exclusively be
Conducted at the address indicated below:

Degmada/Deegaanka:	Howlwadaag	WAAXDA:	Xaawo Taako
LAANTA:	N/A	TABEELAHA:	N/A

SHATIGAN WAXA UU DHACAYAA

This permit expires on the **23-Jun-2023**

Hadii aadan ka run sheegin machuumaadka aad bixisay, ogsoonow in Shatiga dib lagaala noqon doono iyadoo waliba sharciga lagula tiigsan doono.



Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed

Cumar Maxamuud Maxamed

KOMBUYUUTAR SHATI

LAMBAR / Computer Serial No.

48866





FOOMKA BIXIN CADEYN DHISMO SHIRKAD

REP. 264/T.P.N/2022.

Tr, 30/06/2022,

Magaca Malkiilaha →

Mohamed Hussein Ahmed

Magaca qaadaha: →

Mohamed Hussein Ahmed

Meeshuu deganyahay →

KPP Hodan

Telfoonkiisa: →

0615 94 55 58

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAHA: